Gobolka Ohio
Degmada _____ : MAXKAMADDA _____
:
_____ : Lambarka gal dacwadeedka_____
Dacwoode :
:
Liddi ku ah. :
:
_____ :
Eedeysane : GARSOORE _____

: EEDEYSANAHA OO ISKUU UGA TANAASULAYA XAQA UU U LEEDAHAY QAREEN U DOODA

KA TANAASULID XAQA AAD U LEEDAHAY QAREEN KUU DOODA

Aniga oo ah, _____, Eedeysanaha lagu soo oogey inuu geystay dambiga (dambiyada) dacwada ku xusan lana horkeenay maxkamadda waxaa la i wargeliyey xuquuqda hoos ku xusan:

1. Waxa aan xaq u leeyahay in aan qorto ama la ii qabto difaac (qareen) xitaa haddii aan qiranayo dambiga ama aanan diidaneyn waxyaabaha la igu soo eedeeyey.
2. Waxa aan xaq u leeyahay in aan codsado isla markaana la ii soo bandhigey inaan dhageysiga dacwada dib u dhigi karo muddo suurto gal ah si aan u raadsado una helo difaac.
3. Waxaan xaq u leeyahay in maxkamaddu ii qabato qareen lacag la'aan ah haddii aanan qabsan Karin qareen Waxaa la igu wargeliyey in la iga doonayo in aan bixiyo lacag mar kaliya la iga qaado oo ah $25.00 si la iigu helo qareen.

Waxaa aan qirayaa in la igu wargeliyey in qaaligu igu xukumi karo ganaax haddii aan dambiga qirto ama aan diidaneyn waxyaabaha la igu soo eedeeyey ama haddii dambigu igu cadaado ka dib marka ay maxkamaddu ay dhageysato dacwadda liddiga igu ah ee la igu soo oogey. Waxaa aan fahamsanahay in ciqaabta aan mudan kara ay noqon karto in xabsiga la i dhigo, ganaax lacageed, shaqo la igu xukumo, ama in la i mariyo waqti dusha la igala socdo (probation), xaqa aan u leeyahay wadista gaadiidka/ama lahaanshaha gaadiidka oo la laalo (la iga qaado si ku meel gaar ah).

Waxaa intaa dheer oo aan qirayaa, in la igu wargeliyey micnaha ay leedahay qirashada dambiga, dambiga la igu soo oogey oo aanan diidaneyn iyo dambiga la igu soo oogey oo aan diido in aan geystay.

Waxaa intaa dheer oo aan qirayaa, in la i wagreliyey in maxkamadda loo soo bandhigayo caddeymo sharciga waafaqsan oo uu soo bandhigayo qareenka dacwada igu soo oogaya isal markaana uu qaaligu ka yahay dhexdhexaad ama aanu dhinacna raacsaneyn oo aanu ii fidineyn wax caawinaad ama dabacsanaan ah. Waxaa aan fahamsanahay in ay dacwadeydu leedahay difaac laakiin ay suuro gal tahay in aan garaneyn maadaama aanan aqoon u lahayn sharciga. Waxaa sidaa suurto gal ah in aanan garaneyn waxyaabo xuquuq oo aan xaq u leeyahay oo dacwadda aan gacan sare ku yeelan lahaa. Waxaa suurto gal ah in aan waayo xuquuqdaas haddii aan ka hor caddeyn maxkamadda.

Ka dib markii la ii sharxay xaqa aan u leeyahay qareen ii dooda, si hagaagsan ayaan u fahmay mana jiraan wax su'aalo dheeraad ah oo aan maxkamadda weydiinayo.

Waxa aan si qoto dheer uga fikiray xuquuqda aan leeyahay ee sharcigu ii ogol yahay waxaanan halkan kaga tanaasulayaa (ka harayaa) xaqa aan u leeyahay in qareen i difaaco oo uu ii doodo. Waxa aan sidaa ku go'aansaday iyada oo miyirkeygu dhan yahay; isla markaana aan doortey; aaney cidina igu khasbin ama igu cadaadin

_____ _____
TAARIIKH EEDEYSANE

OGOLAASHAHA TANAASULKA

Maxkamaddu waxa ay xaqiijisey in si buuxda eedeysanaha loo wargeliyey xaqa uu u leeyahay/leedahay difaac isla markaana waxa uu eedeysanuhu fahamsan yahay xuquuqdaas; waxaa kale oo maxkamaddu xaqiijisey in eedeysanaha isaga oo ogsoon, doortey, caqligiisu u dhan yahay uu ka tanaasuley xuquuqdaas. Waxaa goob ka ahaa diiwaangeliyaha maxkamadda, Crim. R. 22 iyo 44.

_____ _____

FADLAN BUUXI FOOMKA KU QORAN AFKA INGIRIISIGA

TAARIIKH GARSOORE

FADLAN BUUXI FOOMKA KU QORAN AFKA INGIRIISIGA